**SOMALI**

**Infosheet 1. Police**

# KU OGOW XUQUUQDAADA

## LA FALGALKA BOOLISKA

LEGAL CENTRE LESVOS

**Xaashidan macluumaadka waxa ay ka kooban tahay macluumaad guud oo ku saabsan xuquuqdaada marka aad la falgalayso booliiska Giriiga. Waxay ku salaysan tahay qodobbada sharciga Giriigga oo sax ah ilaa Luulyo 2024.**

**Dhaqan ahaan, qodobbada mar walba ma ixtiraamaan mas'uuliyiinta, sida saraakiisha booliiska laftooda. Xaashida macluumaadka ma aha mid dhammays-tiran oo waa lagu beddeli karaa.**

**Waxaan kugula talineynaa inaad la tashato qareen loo idmaday inuu ku dhaqmo sharciga Giriiga ama NGO-ga bixiya taageerada sharci ee ku saabsan kiiskaaga gaarka ah xaalad kasta.**

# HADII EEY JIRO BAARID BOLIIS WADADA AMA GURIGA

- Haddii sarkaalka booliisku ku **weydiiyo waraaqahaaga aqoonsiga,** oo aad tustid dukumeenti sax ah (tusaale "ausweis" ama kaarka magangalyo-doonka, ogolaanshaha joogitaanka, warqadda booliiska, baasaboorka, iwm. oo leh taariikh iyo sawir sax ah), sarkaalka booliisku maaha  waxay xaq u leeyihiin inay ku waydiiyaan inaad isaga/iyada u raacdo saldhiga booliiska si aad u hubiso aqoonsigaga ama waraaqahaaga.

- Haddi sarkaalka booliisku **rabo in lagugu baaro jidhka**, isaga/iyadu waxay u baahan yihiin inay ku tusaan warqad maxkamadeed tan. Haddii uu jiro isku dayo uu sarkaalku (s) ku doonayo in uu ku sameeyo baaritaanka jirka, waxaad dhihi kartaa "Waan garanayaa xuquuqdayda: ma lihid awood aad ku sameyso baaritaan jireed amar la'aan".

- Haddi booliisku **yimaado gurigaaga,** waajib kuguma aha inaad albaabkaaga furto oo ay soo galaan ilaa ay ku tusaan waaran iyo garsoore ama xeer ilaaliyena uu joogo mooyaane.

- Haddii booliisku uu haysto warqad maxkamadeed si uu jir u baadho ama u baadho gurigaaga iska hubi inaad marka hore arki karto waaranka, iyo, maadaama ay ku qoran tahay Giriig, haddii aadan si fiican ugu hadlin Giriigga iyo/ama aadan akhrin karin qoraalka Giriigga weydii  booliisku inuu sugo ilaa qareenkaaga Giriiggu yimaado.
- Si aad awood ugu yeelatid in aad aqoonsato askarta aad la falgashay, **ku qor nambarka aqoonsiga sarkaalka gaarka** ah ee sida ku qoran dharka booliiska, ama calaamadaha koofiyadda ama gaashaanka booliiska rabshadaha.

**Kuwani waxay aqoonsan karaan saraakiisha, oo ay ku jiraan haddii ay dhacdo in habdhaqankoodu uu kuu keenay wax dhibaato ah ama ku xad-gudbida xuquuqdaada.**

# HADDII LAGU GEEYO SALDHIGA BOOLIISKA

## I. Booliisku waxa ay ku qasban yihiin in ay ku oggolaadaan in aad samayso hal taleefoon oo guul leh (marka uu qofka dhinaca kale ka jawaabo).

- Weydiiso inaad wacdo qareen kaaga Giriigga laga bilaabo wakhtiga ugu horreeya.

- Haddii aadan haysan lambarka taleefanka qareenka Giriigga, wac saaxiib ama qof aad taqaan oo kula xiriiri kara qareen Giriig ah una sheeg qareenka inaad ku jirto saldhigga booliiska oo aad u baahan tahay caawimaad.

- Haddii aadan garanayn saldhigga booliiska aad ku jirto, weydii sarkaalka booliiska faahfaahinta (magaca saldhigga booliiska, cinwaanka).

## II. Waxaad xaq u leedahay inaad aamusto, waxaadna xaq u leedahay turjumaan inuu kuu turjumo waxay saraakiisha booliisku ku sheegaan iyo dukumeenti kasta oo qoran oo lagu siiyo.

- Way fiicantahay inaadan odhan ama saxiixin wax ayada oo uusan joogin qareen Giriig ah.
- Had iyo jeer codso turjumaan.
- Haddii booliisku su'aalo ku weydiiyo, waxaad odhan kartaa "Waxaan sugayaa qareenkayga, wax kasta oo aan sheego waxaan ka sheegi doonaa hay'adaha garsoorka hortiisa".
- Hadii uu sii wado suaalaha boolishka waxaa ku jawaab kartaa waxaa sugayaa looyarkayga ama abukaatahayga

## III. Waxaad xaq u leedahay inaad ogaato sababta laguu xidhay iyo waxa lagugu eedeeyay.

- Booliisku waxay ku qasban yihiin inay ku siiyaan dukumeenti qoran, kaasoo qeexaya xuquuqdaada luqad aad fahmi karto. Dukumeentigan waa in lagu tarjumaa afkaaga hooyo ama luqad aad fahmi karto.

- Ha odhan ama ha saxeexin wax la xidhiidha su'aalaha ama waraaqaha ku qoran luqad aanad fahmin.

- 24 saac gudahooda ee saldhiga booliiska, booliisku waa inuu ku horgeeyaa xeer ilaalinta. Haddii kale, waa inay ku sii daayaan.

# HADDII LAGU WEYDIIYO IN AAD NOQOTO MARKAATI

- Waxaad xaq u leedahay inaad diido inaad markhaati furto.
- Booliisku waxay marag-furkaaga u adeegsan karaan inay dembi kugu geystaan - taasi waxay ka dhigan tahay, inay u adeegsadaan caddaynta aad marqaati ahaan u bixiso si ay kuugu eedeeyaan inaad dembi gashay.
- Had iyo jeer la hadal qareen Giriig ah ka hor intaadan oggolaan inaad markhaati furto.

LEGAL
CENTRE
LESVOS

**WhatsApp:** +30 694 961 8883
**Landline:** +30 225 1040 665
**Iimaylka:** info@legalcentrelesvos.org
**Facebook:** www.facebook.com/LesvosLegal
**Cinwaanka xafiiska:** Komninaki 20, Mytilene 81100
**Saacadaha shaqada :** Isniinta ilaa khamiista - 10 subaxnimo ilaa 2 galabnimo